

Baro Xuquuqdaada Caawinada Loogu Talagalay Ardayda Guri La'aanta Ah



Miyaad:

- La nooshahay asxaab ama qaraabo?
- Ku nooshahay hoteel ama albeergo?
- Ku nooshahay goob hoy?
- Ku nooshahay baabuur ama gaadhi jiif ah (RV)?
- Ku nooshahay goob aan ahayn hoy joogto ah?

Ilmahaagu wuxuu leeyahay xuquuq?

Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu:

- **JOOGO** dugsigooda hadda AMA
- **ISKA-QORO** dugsiga degmada ee goobta aad joogtid.
- **BILAABO** fasalada oo uu isla markiiba **XAADIRO** hawlaha dugsiga inta la dhameystirayo hanaanka isqoridda..
- **Bilaash ku HELO CAAWINAAD DHEERAAD AH** si uu ugu guuleysto dugsiga.

Ma u baahan tahay caawinaad?

- **WAC** degmada dugsiga. **KA CODSO** inaad la hadasho xiriiriyaha McKinney-Vento. Waxaad xaq u leedahay dhageysi.
- **KA WAC** Waaxda Waxbarashada ee Ohio: 614-387-7725 ama 877-644-6338. **KA CODSO** inaad la hadasho xiriiriyaha McKinney-Vento.
- **U DIR** dugsiga warqad aad ku codsanayso caawinaad. **HAYSONUQUL**. (Sawirka warqaddaada oo lagu keydiyo moobilku sidoo kale waa caadi.)

Caawinaad nooc ah ayaad heli kartaa?

- Caawinaadda inaad sii joogto isla dugsiga hadda
- Caawinaadda inaad iska-qorto
- Gaadiidka dugsiga cusub
- Direys iyo cunto dugsiga oo bilaash ah
- Lebisada
- Qalabka dugsiga
- Waxqabadyada iyo adeegyada dugsiga kadib ee uu bixiyo dugsigu.
- Ka dhaafida khidmada dugsiga
- Helitaanka nuqulada kaydka tallaalka.
- Helitaanka nuqulada shahaadooyinka dhalashada
- U gudbinta caafimaadka, la-talinta, ilkaha iyo adeegyada kale

Haddii aad u Baahan Tahay Kaalmo Sharci oo Bilaash ah:



KA WAC:

Khadka Gargaarka Sharciga ee Galbeedka Ohio:
TALEEFANKA BILAASHKA AH:
(888) 534-1432

KA DALBO BARTA INTERNETKA:

Bogga internetka ee Khadka Gargaarka Sharciga:
www.legalaidline.org



Qareennada Sinaanta Sharci ee Aas-aasiga ah (Advocates for Basic Legal Equality, Inc.) iyo Khadka Gargaarka Sharciga ee Galbeedka Ohio (Legal Aid of Western Ohio, Inc.) waa hay'addo sharci oo aan faa'iido doon ahayn oo u adeega baahiyaha sharciga madaniga ah ee dadka iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee ku nool Galbeedka Ohio. Macluumaadkani ma aha tallo sharci. Waa warbixin guud. Ma aha beddelka in xaaladdaada aad kala hadasho qareen (sharci-yaqaan). Waxaad wali u baahan kartaa caawinaadda qareenka. Dib u cusbooneysiintii u danbeysay Nofeembar 19, 2019

Mashruucan waxa lagu maalgaliyay deeq ay bixisay Hay'adda Samafalka Sharciga ee Dayton (Dayton Legal Heritage Foundation) ee The Dayton Foundation.

